

## **Takoorid, dhibaateyn iyo si xun ula dhaqan**

Takoorid waa marka arday loola dhaqmo si kaxun sida ardayda kale, cilladana waxaa keena ama ay xariir la leedahay waxyaabahan hoos ku qoran ee salka kuleh takoorka:

- Jinsiga qofka
- Isirka qofka
- Diinta ama waxa uu qofka aamisan yahay
- naafonimo
- nooca qofka uu qofka jecel yahay
- da'da
- aqoonsiga jinsiga qofka ama muujinta.

Dhibaateynta iyo si xun ula dhaqmidda labadaba waa mid khuseeya ku xadgudubka sharafta ardayga.

Dhibaateynta iyo sixun ula dhaqmida waxay noqon karaan sida:

- jir ahaan(garaacid ama dhulka ku tuurid,)
- af ka hadal(handadaad, caay, naaneys)
- maskaxiyan ubahdilid (dibada ku faquuqid, ka jeedsasho, in ay dadka dhan baxaan markuu qofku soo galo)
- qoraallo iyo sawiro (waraaqo yaryarlappar, sawiro, maseej, fariin sawir, msn, fariimo kala duwan ee laysu mariyo baraha bulshada)
- dhibaateynta iyo si xun ula dhaqmida taasoo la xiriirta ujeedo galmo.

**Dhibaateynta xaga galmada ama taabashada waxay noqon kartaa:**

- ra'yi ama sharuud adeeg galmo oo aan lasoo dhoweyn
- xariir taabasho jireed ee uusan qofka diyaar u ahayn

- soo jiidasho galmo oo aan lasoo dhoweyn, jalleeco, foori iyo faallooyin ku saabsan muuqaalka qofka
- ereyada jinsiga, sawirada anshax darada ah iyo kaftan sharaf dil ah oo ku saabsan jinsiga uu qofka ka tirsan yahay

Dhibaateynta waa dabeecad la xiriirta qaababka ama sababaha takoorka.

Si xun ula dhaqmida guud wax xiriir ah lama laha takoor ama midab kala sooc.

## **Aragtideena**

Iskuulkeena waa in dhamaan la is xushmeeyaa oo uusan qofna dareemin in sixun loola dhaqmayo, la daba galayo, la dhibaateynayo ama la takoorayo.

## **Yoolka/hadafka sanad dugsiyeedka 2020-2021**

**Qeyb kamid ah qorshaha tallaabooyinka firfircoon ee ka dhanka ah xadgudubyada, dhibaateynta iyo takoorka:**

- Ardaydu waxay helaan waxbarasho qiyamka dimuqraadiga ah.
- Wada hadal caafimaadka kalkaaliyaha cafimadka ee iskuulka.
- Goobaha shaqada iyo tabobarka waa in lagu wargeliyo qorshaha.
- Waxaa la bixiyaa warbixinno ku saabsan qawaaniinta, nidaamka iyo tallaabooyinka firfircon ee ka dhanka ah xadgudubyada, dhibaateynta iyo takoorka.
- Ka hortaga xadgudubyada khadka internetka.
- Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu ka qeyb qaato howlaha in dadka isku si loola dhaqmo ah.
- Qof kastaa waa inuu ka falceliyaa oo uu baaraa hadii qofna loo geysto dhibaateyn, takoorid iyo/ ama dhaqan xumo.
- Shaqada ka dhanka ah xadgudubyada, takoorka iyo sixun ula dhaqmida xun waa in la diiwaan geliyo, la daba galo lana qiimeeyo.

- Baaritaanada la xiriira samoqabka iyo amniga waa in loo sameeyo si joogto ah sanad walba.
- Natiijooyinka sahmintu waa in looga hadlo kulanka ardayda iyo kooxda shaqaalaha.
- Ardaydu waa inay ogaadaan halka lala xiriiro hadii ay lakulmaan dhibaataayn, takoorid iyo/ ama xadgudub.

*Intaas wixii dheer ee ah: Tallaabooyinka firfircoon si kor loogu qaado si isku mid ah ula dhaqmida iyo kahortagga takoorka, dhibaataaynta iyo xadgudubyada. Ka aqriso*

<http://www.filipstad.se/gy>

## Halkeebuu qofka la xiriirayaa hadii uu xadgudub dhaco?

### Horjooge

Isku xiraha telefonada komunka

0590 – 611 00

### Diritorka

Hans Ryhed

0590 – 61411, 070-606 62 22

### Cawiyaha diritorka

T.f Olof Wermelin

0590 – 61414, 073-270 39 55

Ann-Christin Olsson

0590 – 61418, 072-599 03 53

### La taliyaha

Martina Björfeldt

070-191 81 19

### Kalkaalisada iskulka

Eva Edholm

0590-61410

070-646 14 10

### Isku duwaha

Anita Supponen 073-275 63 46



**FILIPSTADS  
KOMMUN**

**Tallaabooyinka firfircon ee  
ka dhanka ah dhibaataaynta,  
xadgudubyada iyo takoorka**

**Spångbergsgymnasiet**

**Ungdomsgymnasiet**

**Sanad dugsiyeedka 2020-  
2021**

